

## **Somaliland Cross Party Parliamentary Group Press Release on visit to the UK: 31/01/2008**

---

### **Warsaxaafadeed**

Safarkani waxa uu guud ahaan ka mid yahay dadaalka aynu dhawaan shacab iyo dawladda ugu jirno in aynu qadiyadeena ka dhaadhicino bulshada caalamka, waxaannu ka mid yahay dadaalada dheeraadka ah ee uu Golaha Wakiillada ee la soo doortay ugu jiro ka qayb qaadashada baadi-goobka ictiraafka uu qarankeenu aadka ugu baahan yahay.

Safarkani waxa uu gaar ahaan daba socdaa safar ay dhawan dalkeena ku yimaadeen xildhibaanada ka tirsan Baarlamanka Ingiriiska, kuwaas oo ka mid ah urur la yidhaah All-party Parliamentary Group for Somaliland (APG) oo ka kooban xildhibaanada labada aqal ee Baarlamanka Ingiriiska oo tiradoodu hadda dhantahay 38 mudane, kuwaas oo isu bahaystay meel-marinta qadiyadda Somaliland. Xildhibaanadaas waxa hoggaaminayey Mudanaha aynu aadka ugu mahad-celinayno ee Hor. Allun Michael, mudanahaas oo aynu dhammaanteen ognahay sidii qiimaha lahayd ee isaga iyo saaxiibadii ay Madaxweynaha iyo weftigiisii ugu soo dhaweeyeen Baarlamanka Ingiriiska.

Waxa aannu shirar badan kadib isla garanay in Golaha Wakiillada Somaliland sameeyo giddi farsamo oo gaar ahaan ula shaqeeya ururkaas APG. Intaas kadib ayaa Shirguddoonka Galuhu sameeyey guddidan gaarka ah oo magaceedu yahay Cross-party Parliamentary Group (CPG), kana kooban 15 mudane.

Shir kooban oo dhawaan labada guddi ku yeesheen aqalka Baarlamanka Ingiriiska (House of Commons), ayaa laysla gartay in nalaku martiqaado Baarlamanka Ingiriiska halkaas oo aannu kula kulmi doono dhammaan xubnaha ururka APG oo aannu wada qaban doono hawlo badan oo ah danaha Somaliland hadday tahay hawlaha ictiraafka iyo kuwa horumarinta dalkeena.

Waxa kale oo aannu fursadan qaaliga ah uga faa'iidayaan doonaa in aannu la kulano jaaliyadeena joogta carriga Ingiriiska oo kaalin lama ilaawaana kaga jirta dhismaha qarankeenan curdinka ah, waxa aannu ku dhiirigelin doonaa ka qayb qaadashada dardar-gelinta hawlaha ictiraaf raadinta oo ay marka horeba kaalin muhiim ah kaga jireen iyo in shakhsi waliba iska xilsaaro sidii uu qadiyadeena uga dhaadhicin lahaa meesha iyo cidda uu la noolyahay.

Talo bixin

Waxa annu Madaxweynaha iyo xukuumaddaba ugu baaqaynaa haddii annu nahay Golihii Wakiillada ee la soo doortay in si wadajir ah loogu wada hawlgalo arrinta ictiraaf raadinta iyo ka dhaadhicinta qadiyadeenaa bulshada caalamka, taas oo aan ciddina xaq gaar ah u lahayn una qaban karin. Waxa annu soo jeedinaynaa in dhammaan waaxaha dawladda, xisbiyada qaranka, jaaliyadaha dibedda, ganacsatada dalka iyo muwaadiniinta aqoonta leh laga wada qaybgeliyo ka midho dhalinta qadiyadeena.

Mahadnaq

Waxaannu mahad gaar ah u celinaynaa marka u horreysa Shirguddoonka iyo xildhibaanada Golaha Wakiillada oo taageero iyo dhiirrigelin nagu siiyey safarkan qaaliga ah ee aynu dhammaanteen Ilaahay ka baryeyno in uu ka dhigo mid horseeda guulo badan oo aynu tabeyno.

Mar labaadka waxaannu mahad gaar ah u celinaynaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland oo gacan weyn naga siiyey suurtoogelinta safarkan taariikhiga ah.

Waxa kale oo annu iyagana mahad u celinaynaa shirkadaha wadaniga ah ee Dahabshiil iyo Telesom oo iyaguna taageero lama ilaawan ah naga siiyey hawlahayaga.

31/01/2008